

# Bulshooyinka dhaqamada kala duwan cida mudnaanta jawaab celinta leh inta lagu gudajiro coronavirus

Barnaamijka Daabacaada Xaqiiqda - Febraayo 2021

Somali | Soomaali

OFFICIAL

## Dulmarka Barnaamijka

Bulshooyinka dhaqamada kala duwan cida mudnaanta jawaab celinta leh inta lagu gudajiro coronavirus (COVID-19): Wejiga labaad ('barnaamijka') wuxuu deeqo siiyaa ururada dhaqamada iyo diimaha ee Victoria. Barnaamijku wuxuu xaqiijiyaa in ururradu ay si wax ku ool ah uga jawaabi karaan faafidda cudurka 'coronavirus' (COVID-19) iyo saamaynta ay ku leedahay bulshooyinka dhaqamada iyo diimaha kala duwan leh, waxuuna si gaar ah uga jawaabayaa caqabadaha u gaar ka ah isla markaasna si dheeraad ah u saameeya haweenka iyo dhallin-yarada ka soo jeeda dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba dhaqamada kala duwan (CALD) iyo waliba bulshooyinka kasoo jeeda dhaqamada iyo diimaha soo kordhay. Wuxuu sidoo kale dhiirgaliyaa awood dhisida ka dhexeysa shabakadaha bulshada iyo ururada maxalliga ah.

## Bulshada mudnaanta koowaad leh

- Bulshooyinka dhaqamada kala duwan iyo diimaha cusub iyo kuwa soo koraya leh.
- Dhaqamada-kala-duwan iyo diimaha ay hogaaminayaan dhalinyarada iyo / ama mashaariicda inta badan taageera dhalinyarada dhaqamada-badan.
- Dhaqamada-kala-duwan iyo diimaha ay haweenku hogaamiyaan iyo / ama mashaariicda inta badan taageera dumarka dhaqamada-badan.

## Ujeedooyinka Barnaamijka

Ujeedooyinka ugu muhiimsan ee barnaamijku waa:



in lagu hayo tirada yar iyo saamiga dadka bulshooyinka dhaqamada iyo diimaha kala geddisan ee qaba cudurka coronavirus (COVID-19) kuna sugan Victoria sida hada eey tahay;



kordhinta tirada iyo saamiga dadka laga baarayo coronavirus (COVID-19), taageerida u diyaargarowga talaalka, iyo taageerida tiro aad u tiro badan iyo saamiga shaqsiyaadka laga talaalay ee bulshooyinka dhaqamada iyo diimaaha kala duwan ee Victoria;



harumarinta fahamka iyo u hogaansanaanta tilmaamaha caafimaadka ee Dowlada Fiktooriya oo eey qeyb ka yihiin bulshooyinka dhaqamada iyo diinta ee Victoria;



in lasameeyo iskaashi xoogan qeybaha dhaqamada kala duwan ee Victoria; iyo



in la dhiso awooda shabakadaha bulshada, ururada iyo adeegyada si loo taageero kahortaga loona hormariyo u diyaargarowga kahortaga coronavirus mustaqbalka (COVID-19).







OFFICIAL



Families,  
Fairness  
and Housing

## Adeegsiga maalgelinta

Maalgelinta waxaa loo isticmaali karaa ujeedooyinka soo socda:

- **libsiga alaabta** sida:
  -  waxyaabaha lagama maarmaanka u ah gargaarka degdegga ah (oo ay ku jiraan cuntada);
  -  waxyaabaha badbaadada caafimaadka shakhsiga ah sida maaskaro iyo gacmo nadaafiyaha (hand sanitizer); iyo
  -  tikniyoolajiyadda isgaarsiinta iyo softiweerka.
- **Bixinta adeegyada** sida:
  -  ka qeybgalka arimaha bulshada;
  -  isgaarsiinta caafimaadka iyo waxbarashada, iyo tarjumaadda fariimaha caafimaadka, iyo
  -  wacyigelinta iyo taageerada bulshada, oo ay ku jiraan adeegyada tarjumaadda oo qayb ka ah taageeradan.
- **Hawlo kale oo kasta** sida ay cadeeyeen jaaliyadaha iyo wakiiladooda ayna aqbaleen Arimaha Dhaqamada-kala-duwan, oo taageera bulshooyinka dhaqamada badan iyo diimaha si ay uga gaashaantaan inay noqdaan kuwa uu ku dhaco cudurka coronavirus (COVID-19) waxayna shaqsiyaadka ka taageertaa baaritaanka iyo sidii eey u raaci lahaayeen tilmaamaha caafimaadka; ama eey wax ka qabtaan qatarta coronavirus (COVID-19) uu ku hayo bulshada iyo dhaqaalaha.

## Sida loo codsado

Codsiyada barnaamijka waa in lagu soo gudbiyaa khadka internet ka ee online. Fadlan isticmaal linkiga soo socda si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ay ku jiraan Tilmaamaha Barnaamijka iyo meeshaad ka heli laheed foomka qadka internet ka ee onlike ka: <https://www.vic.gov.au/priority-response-multicultural-communities-during-coronavirus-covid-19>

**Waxaa la furayaa:** 24 Febaraayo 2021

**Wuxuu xirmayaa:** 4 galindanbe Jimcaha 28 Maajo 2021

Codsiyada soo daahay ama aan dhameystirneyn lama tixgelin doono.

Si aad u hesho dukumeentigan oo qaab kale ah, wac [1300 112 755](tel:1300112755), adoo adeegsanaya National Relay Service 13 36 77 haddii loo baahdo, ama emayl u dir [Kooxda Maalgelinta, CALD Gurmada bulshooyinka](mailto:multicultural.covid.taskforce@dffh.vic.gov.au) <multicultural.covid.taskforce@dffh.vic.gov.au>.

Waxaa qormadan fasax u leh isla markaasna daabacday Dowladda Victoria, 1 Treasury Place, Melbourne.  
© Gobolka Victoria, Australia, Waaxda Qoysaska, Cadaaladda iyo Guriyeynta, Febraayo 2021.

Waxaa laga heli karaa jawaabta mudnaanta leh ee bulshooyinka dhaqamada badan inta lagu jiro coronavirus (COVID-19) <<https://www.vic.gov.au/priority-response-multicultural-communities-during-coronavirus-covid-19>>